

Ila soo xidhiidh

**Su'aalo Degdeg ah
Ama cabashooyin**
Telefoonka caafimaad
ee Kalkaalinta
651-229-3890

Ballamo
651-290-8707

Muhiim in la Ogaado

Carruurtaadu ha dhaafo hal saac
wakhtigooda hurda ee caadiga
maalinta ka horaysa baadhitaanka.

Diyaarinta dawada seexinta ama Suuxinta Ka hor Habka

Preparing for Sedation Before Your Procedure | Somali

Tilmaamaha Cunitaanka iyo Cabbitaanka
Baadhitaanka Uurka

waxbarashada bukaanka
PTT081-SO

Qodobada Muhiimka ah

- Habka aad qaadan doontaa waxa uu u baahan doonaa seexin ama suuxin. Tan macnaheedu waxa weeye waxaad u baahan doontaa feejignaan gaar ah ka hor habka.

Tilmaamaha Cunitaanka iyo Cabbitaanka

Sababaha badbaadada, calooshaadu waa in ay madhnaataa ka hor hababka. Haddii aanad raacin tilmaamahan, waa in aynu jadwal dib ugu samaynaa habkaaga.

9 Saacadood ka hor Dawada seexinta

HA cunin cuntooyinka adag bilowga 9 saacadood ka hor intaan jadwal loo samayn dawada seexinta.

Cuntooyinka adag waxaa ku jira cuntooyin ama dareere aanad arki karin sida:

- Sharaabka Caano iyo macaan laga sameeyo
- Caano fadhi iyo sharaab cabbitaan la shiiday
- Cabbitaanka liinta
- Beed la isku walaaqay oo la kariyay
- Macmacaan
- Saanwij
- Badar (uu ka mid yahay badarka carruurta)

Afka ah ama tuunbada caloosha la geliyo ee dareeraha dawada waa la ogolyahay. (Ka eeg faahfaahinta hoosta cinwaanka Siinta dawada.)

7 Saacadood ka hor Dawada seexinta

HA cabbin caano ama caanaha carruurta laga bilaabo 7 saacadood ka hor Dawada seexinta la qorsheeyay.

HA bilaabin quudinta tuunbada laga bilaabo 7 saacadood ka hor Dawada seexinta la qorsheeyay.

Afka ah ama tuunbada caloosha la geliyo ee dareeraha dawada waa la ogolyahay. (Ka eeg faahfaahinta hoosta cinwaanka Siinta dawada.)

5 Saacadood ka hor Dawada seexinta

HA cabbin caanaha naaska oo bilowga 5 ka hor intaan qaliinka la qorshayn.

Afka ah ama tuunbada caloosha la geliyo ee dareeraha dawada waa la ogolyahay. (Ka eeg faahfaahinta hoosta cinwaanka Siinta dawada.)

3 Saacadood ka hor Dawada seexinta

HA cabbin dareere saafi ah bilowga 3 Saacadood ka hor Dawada seexinta intaan la qorshayn.

Dareere saafi ah (dareeraha aad wax ka dhex arki karto) waa:

- Biyo
- Cabbitaanka tufaaxa
- Jell-O ama jalaatiin aan khudrad lahayn
- Shaah
- Bunka madow
- Cabbitaanka canabka
- Iskriim qoriile
- Biyo dhadhan leh ama Kool-Aid

HA siin afka ama dareeraha tuunbada caloosha dawada oo ka bilow 3 Saacadood ka hor Dawada seexinta intaan la qorshayn.

Socda bogga xiga.

Siinta dawada

Dawadu waa in ay ahaataa qaab dareere ama mid lagu laaqay dareere adaga ama cunto. Dareeraha dawada waa **IN AANAY** ka badnaan 30 mililiir, ay ka mid tahay ta lagu shubayo. Dawooyinka lagu laaqay cunto la adkeeyay ama dareere sidoo kale, ma **KA** badan karaan 30 mililitir.

Baadhitaanka Uurka

Dhammaan bukaan jiifka haweenka ah ama kuwa bilaabay in ay xaydka helaan waxaa laga baadhayaa uur intaan la seexin ama la suuxin. Baadhitaanka uurka waa in lagu sameeyaa rugtaada caafimaad ee koowaad mid ilaa toddoba maalmood ka hor habkaaga. Fadlan keen natiijada ballankaaga Gillete. Haddii aanad qaadan baadhitaanka uurka ka hor intaanad iman Gillette, halkan baynu ku samayn doonaa. (Waxaynu qaadi doonaa mid uun kaadi ama muunad dhiig ah.)

Diidista Baadhitaanka Uurka

Bukaan jiifka. Daryeel bixiyaha/waalidka ama masuulka sharciga ah waxa uu leeyahay xaq uu ku diido baadhitaanka uurka. Dhakhtarka iyo kooxda suuxinta waxay markaa u baahan doonaa in ay go'aansadaan haddii ay weli ku socon doonaan habka qorshaysan, Diidmada baadhida uurka waxaa lagu qori doonaa diiwaanka caafimaad, oo ogolaanshaha in la sii wado habka waxa loo baahan doonaa in la helo.

Baadhitaanka Uurka ka dib

Bukaan iyo dhakhtarka habka samaynayaa waxaa lagu wargelin doonaa natiijooyinka baadhitaanka uurka. **BAADHITAANKA NATIIJADA IN UUR JIRO QARSOODI AYAA LOO HAYAA.** Inta badan, waxay khusayn doontaa bukaan jiifka in uu go'aansado sida lagu gaadhsiinayo natiijooyinka baadhitaanka uurka waalidka/daryeel bixiyaha. Haddii aanu bukaan jiifku awood u lahayn go'aanada ama aanu hadli karin, shaqo bulsho iyo dhakhtar ayaa go'aamin doonta haddii ay habboontahay in loo sheego daryeel bixiyaha natiijada baadhitaanka uurka.